

HANTIDHOWRKA GUUD

2. Tixraac Warqadda hantid-dhowrka guud ee dowladda ee sumadeedu tahay /XHG/40/2007 ee 05/07/2007, taasoo uu hanti-dhowrka guud si buuxda ugu caddeynayo in loo diidey wada shaqeyntii kala dhexysay wasaarada maaliyadda iyo xisaabiyaha guud, taasoo ahayd la socodsiinta dhaqadhaqaaqa maaliyadda dowladda, wixii masuuliyad ah ee arrintaas ka dhashana uusan dusha u ridan doonin mustaqbalka. Wuxuu kaloo sheegay in wasaaradda maaliyaddu ay ka baaqsatey inay sameeyso miisaaniyad si loo kontroolo dhaqadhaqaaqa xisaabaadka maaliyadda dowladda.

GAROWEONLINE

- a) Sida ku cad qodobka 31-41 ee xeerka maamulka maaliyadda dalka iyo xisaabintiisa (**Law no-2, 29 Dec. 1961, financial & accounting procedure of the state**), hantidhowrka guud ayaa u xilsaaran inuu baaro, hubiyo, kormeero, islamarkaana uu si joogto ah ula socdo dhamaan dhaqadhaqaaqa maaliyadda dowladda wixii soo gala iyo wixii baxa (income & expense) haddii taas la waayana waxaa cad in maamulka maaliyadda dalka uu ka dhex socdo musuq-maasuq iyo wax is-daba marin mug weyn (corruption and financial irregularities), waxaana shaki ku jirin in canshuurta ay muwaadiniintu bixiyaan, deymaha iyo deeqaha la siiyo dalka soomaaliya intuba ay si fudud ugu dhacaan jeebka shaqsiyaad fara-ku-tiris ah oo golaha xukuumada iyo wasaaradda maaliyadda ka tirsan.
- b) Sidoo kale hantidhowrka guud ayaa u xilsaaran inuu caddeeyo tallaabo kasta oo maaliyadeed oo la doonayo in la qaado, inay sharciga waafaqsan tahay iyo in kale (heshiis lacageed, deyn, deeq iwm), waxaana loo baahan yahay ogolaashadiisa oo qoraal ah, waxaana layska dhega-tireyey muddo dheer fulinta iyo u hoggaansanka shuruucda maaliyadda dalka, iyadoo mar walba si ku talo-gal ah loo abuurayo xaalado aan dhab ahayn oo qalqal lagu gelinayo ku dhaqanka sharciga si wax laysu daba-marisiyo awgeed.
- c) Maamul xumida, musuqmaasuqa, boobka hantida dowladda iyo iska indha-tirka shuruucda maaliyadda dalku waa tallaabooyin loogu talo galay in lagu niyad jebiyo shacbiga soomaaliyeed, isla markaana lagu maja-xabiyo dowladda FKMG iyo hayadaheeda. Arrintani waxay soo jiidamaysay ilaa markii la dhisay dowladda, waxayna hadda mareysaa meeshii ugu xumayd, waxaana aad argagax u leh inaan la kala sooci karin waqtigan lacagta dowladda iyo midda shaqsiga wax maamulaya maadama aan si dowladeed wax loo maareynaynin, masuuliyiinta hayadaha dowladduna ay shaqsigaas u baryo tagaan.
- d) Xafiiska xeer ilaaliyaha guud ee Qaranku wuxuu dhowaan soo bandhigi doonaa tallaabooyin sharciga waafaqsan oo lagu soo af-jarayo fadeexadaha maaliyadeed ee hareeyey maaliyadda dalka, ciddii falkas lagu helana waxay waayi doontaa xorriyadeeda shaqsiyadeed iyo xoolaha ummadda ee ay sida xatooyadaha ah u uruursatey.